



## **War murtiyeed**

**Xiriirka Warbaahinta:** Sam Read, 206.727.8808, [sam.read@seattle.gov](mailto:sam.read@seattle.gov)

### **Guddiga Dib-u-dejinta Seattle wuxuu ku martiqaadayaa ka qaybgalka golayaasha dadweynaha**

**SEATTLE** (Aabriil 29, 2022) – Guddiga Dib-u-dejinta Seattle wuxuu hadda baarayaa sidii dib loogu habeyn lahaa xudduudaha todobada degmo ee Golaha Magaalada Seattle waxayna ku casumayaan xubnaha bulshada inay wax ka ogaadaan nidaamka oo ay jawaab-celin ka bixiyaan fagaarayaasha dadweynaha ee soo socda. Golayaal gaar ah ayaa loo qorsheeyay degmo kasta oo Golaha Magaalada ah. Kulamadan, Guddiyada Dib-u-dejinta Seattle waxay bari doonaan xubnaha bulshada habka dib-u-qaybinta waxayna soo bandhigi doonaan maabyo is-dhexgal ah oo faahfaahinaya isbeddellada xuduudaha ee qabyada ah iyo sida ay u saameyn karaan degmooyin gaar ah. Kulamadu waxay noqon doonaan kuwo isku dhafan (kulan toos ah iyo mid online ah) labadaba xubnaha dadweynuhu waxay heli doonaan fursad ay su'aalo ku weydiyaan oo ay jawaab-celin toos ahna siiyaan Guddiga.

"Guddoomiyeyaashu waxay u baahan yihiin taladaada iyo hagitaannada ku saabsan tixgalinta muhiimka u ah bulshadaada Degmooyinka Golaha Magaalada," ayuu yiri Eliseo Juarez, Guddoomiyaha Guddiga Dib-u-dejinta Seattle. Miyay tahay inay aad ugu dhowaato buuraha iyo marin-biyoodyada ama ay noqoto mid isku xidhan intii suurtagal ah? Ma tahay in ay raadiso in ay ilaaliso aagagga bulshada ee taariikhiga ah ee hal degmo? Waxaan u baahanahay ka qaybgalkaaga si aan u sheegno sida aan u samaynay khariidad kama dambaysta ah oo matalaysa xaafad kasta iyo bulsho kasta si cadaalad ah tobanka sano ee soo socda."

Guddiga Dib-u-dejinta Seattle waa hay'ad madax-bannaan, oo aan xisbina ka tirsanayn oo ka kooban shan qof oo deggan Seattle oo mas'uul ka ah dib-u-qaabaynta xudduudaha cusub ee Degmada Golaha Deegaanka si ay u muujiso korodhka dadweynaha ee magaalada. Komishanku waxa uu raacaya shuruudaha Axdiga Magaalada oo la isticmaalayo khibrada nidaamka macluumaadka juqraafiyeed (GIS) iyo xogtii ugu dambaysay ee Tirakoobka 2020 si loo sawiro xuduudo cusub oo loo soo saaro degmooyin qiyaas ahaan la siman dadweynaha. Sida ugu macquulsan, Guddigu waa inuu sidoo kale tixgeliyo arrimo dheeraad ah, sida raacida xudduudaha degmada ee jira, aqoonsiga marin biyoodka iyo xuduudaha juqraafiga, iyo aqoonsiga bulshooyinka Seattle iyo xaafadaha.

Marka loo eego tirakoobkii 2020, dadweynaha Seattle waa 737,015, kobac ah 21.1% ilaa 2010. Habka dib u kala qaybinta ayaa hubin doona, marka la gaadho wareegga doorashada 2023, degmo kasta oo Golaha Deegaanka Seattle ay ku jiri doonto ku dhawaad 105,288 qof. Si loo helo tiradaas habka dib-u-dejinta ayaa dib u habeyn ku sameyn doona xuduudaha dhammaan degmooyinka iyadoo la ballaarinayo degmooyinka 1, 2,5 iyo 6 iyo qandaraasyada degmooyinka 3, 4, iyo 7.

#### **Ka qaybgal Madasha Dadweynaha**

Horey isku diiwaan geli <https://seattle.surveymonkey.com/r/VXM2PGW>.

- **Degmada 1 golaha Dadweynaha: Maajo 15, 2022 laga bilaabo 1:00pm-3:00pm**

Cinwaanka: High Point Library, High Point Meeting Room: 3411 SW Raymond St, Seattle, WA 98126

Xiriirinta araga fog: <https://us06web.zoom.us/j/81346766847>

- **Degmada 2: Golaha Dadweynaha May 19, 2022 laga bilaabo 5:30pm-7:30pm**  
Cinwaanka: El Centro de la Raza Centilia Cultural Center: 1660 S Roberto Maestas Festival St, Seattle, WA 98144  
Xiriirinta araga fog: <https://us06web.zoom.us/j/81813406544>
- **Degmada 3 Golaha Dadweynaha: Juun 2, 2022 laga bilaabo 5:30pm-7:30pm**  
Goobta Shirka: Garfield Community Center, 2323 E Cherry St, Seattle, WA 98122  
Xiriirinta araga fog: <https://us06web.zoom.us/j/82983603669>
- **Golaha Dadweynaha ee Degmada 4: Juun 9, 2022 laga bilaabo 5:30 galabnimo-7:30 galabnimo**  
Goobta Shirka: Wallingford Community Senior Center within The Good Shepherd Center, 4649 Sunnyside Avenue North. suite 140  
Xiriirinta araga fog: <https://us06web.zoom.us/j/82217028349>
- **Degmada 5 Golaha Dadweynaha: Juun 16, 2022 laga bilaabo 5:30pm-7:30pm**  
Cinwaanka: Lake City Branch - Seattle Public Library Meeting Room, 12501 28th Ave NE, Seattle, WA 98125  
Xiriirinta araga fog: <https://us06web.zoom.us/j/85403374640>
- **Golaha Dadweynaha ee Degmada 6: July 14, 2022 laga bilaabo 5:30 galabnimo-7:30 galabnimo**  
Goobta Shirka: Ballard Branch - The Seattle Public Library, 5614 22nd Ave NW, Seattle, WA 98107  
Xiriirinta araga fog: <https://us06web.zoom.us/j/82177793287>
- **Golaha Dadweynaha ee Degmada 7: Luulyo 21, 2022 laga bilaabo 5:30 galabnimo-7:30 galabnimo**  
Cinwaanka: Bertha Knight Landes (BKL) Room - First Floor of City Hall, 600 4th Avenue, Seattle WA, 98104  
Xiriirinta araga fog: <https://us06web.zoom.us/j/86215361885>

Haddii aadan awoodin inaad ka soo qaybgasho fagaare dadweyne, waxaad sidoo kale kaga qaybqaadan kartaa adoo eegaya maabka qabyada ah oo lagu soo gudbiyey faallooyinka dadweynaha kadibna faalo ku soo gudbiya <https://www.seattle.gov/redistricting/how-to-participate>.

Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah ama aad codsanayso adeegyada tarjumaada mid ka mid ah golayaasha dadweynaha, fadlan kala xidhiidh Elsa Batres-Boni at [Elsa.Batres-Boni@seattle.gov](mailto:Elsa.Batres-Boni@seattle.gov) ama (206) 256-6198.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Guddiga Dib-u-dejinta Seattle, booqo <http://www.seattle.gov/redistricting>.

###